**Xafiiska Adeegyada Naafada Korriinka (ODDS) Hagaha Medicaid ee Loogu Talagalay Qoysaska Carruurta Leh ama Qabta Naafonimada Garaadka ama Korriinka (I/DD)**

Gobolka Oregon waxa uu beddelay sida dadka Oregon ay u codsadaan macaashka Medicaid. Nidaamkan cusub ayaa loo yaqaanaa OregONEligibility (ONE). Hagahan ayaa sharraxaya isbeddeladan oo qeexaya tallaabooyinka ay qoysku qaadi karaan si ay u codsadaan u-qalmitaanka Medicaid markii ugu horreysay. Haddii qoyskaaga ama ubadkaagu ay horay u qaadan jireen Medicaid, fadlan tixraac Hagaha Dib-u-cusboonaysiinta Medicaid ee ODDS.

**Maxay tani muhiim u tahay?**
Inkasta oo dad badani ay u maleynayaan in caymiska Medicaid ee ka jira Oregon inuu yahay helitaanka macaashka caafimaadka iyada oo loo marayo Qorshaha Caafimaadka Oregon (OHP), Oregon waxay sidoo kale ka faa'iidaysatay dabacsanaanta xagga naqshadaynta barnaamijyadeeda Medicaid si ay lacagaheeda ugu isticmaasho Medicaid si ay ugu maalgeliso barnaamijyada iyo adeegyada kale. Dhab ahaantii, dad badan ayaa yaaba markay ogaadaan in badi adeegyada I/DD ay bixiso ama malgaliso Medicaid. Si loo helo inta badan adeegyada I/DD, ubadka waa in marka hore la go'aamiyaa inuu u-qalmo Medicaid. Nidaamka xaq u yeelashada ee barnaamijka ONE ayaa eegi doona dhammaan siyaabaha kala duwan ee ilmaha leh I/DD inuu u-qalmi karo adeegyada ay maalgeliso Medicaid, ***xitaa marka dakhliga qoyska uu ka sarreeyo xaddiga dakhliga.***

## SU’AALAHA BADANAA LA ISWEYDIIYO (FAQ):

**Waa maxay farqiga u dhexeeya adeegyada Medicaid iyo adeegyada naafada korriinka?**
*Medicaid* waxay siisaa caymiska caafimaadka malaayiin qof oo Ameerikaan ah, oo ay ku jiraan dadka waaweyn ee dakhligoodu hooseeyo, carruurta, haweenka uurka leh, dadka waaweyn iyo dadka naafada ah.

Oregon *DD Services,* oo loo yaqaano Waiver and K Plan/Community First Choice, ayaa Oregon siisa xaqa ay u leedahay inay isticmaasho lacagaha dawladda dhexe si ay u kordhiso adeegyada bulsheed ee loogu talagaly dadka ay la il-daran naafonimada garaadka iyo korriinka ee buuxiya shuruudaha u-qalmitaanka. Adeegyadan naafanimada korriinka ah waxaa ku jiri kara: isuduwidda adeegga si gacan lagaaga siiyo inaad fahamto adeegyada I/DD, fursado badan oo ilmahaagu ku noqon karo xubin firfircoon oo bulshada ka mid ah, daryeelka gargaarka, taageerada helitaanka daryeelayaal dheeraad ah si ay gacan uga gesytaan baahiyaha daryeelka maalinlaha ah, tababarka qoyska si ay u fahmaan sida ugu wanaagsan ee cunugaada loo ilaaliyo, oo aad uga caawiso inaad u beddesho guriga si aad si sahlan ugu daryeesho ilmahaaga.

**Ka waran haddii ilmahayga aan weli la go'aamin inuu u-qalmo adeegyada DD?**
Waxaad codsan kartaa Medicaid wakhti kasta, si kastaba ha ahaatee, waxaa muhiim ah oo gacan ka geysan kara in marka hore la go'aamiyo in ilmahaaga u-qalmo adeegyada DD. **Tixraac Talooyinka loogu talagalay Waalidiinta, qeybta A1, si aad u hesho tilmaamaha.**

**Sideen u codsan karaa Medicaid-ka loogu talagalay ilmahayga?**
Barnaamijka cusub ee OregONEligibility (ONE) wuxuu kuu oggolaanayaa inaad Medicaid ka codsato khadka, telefoon ahaan, shakhsi ahaan, ama adigoo buuxinaayo warqadda codsiga. Waa muhiim inaad si sax ah u buuxiso foomka codsashada Medicaid si loo tixgeliyo dhammaan siyaabaha ilmahaagu ugu qalmi karo adeegga Medicaid. **Tixraac Talooyinka loogu talagalay Waalidiinta, qeybta A2, si aad u hesho tilmaamaha.**

**Isku darka dakhliga qoyskayaga ayaa ka sarreeya xaddiga u-qalmitaanka Medicaid. Ilmahayga naafada ah weli ma heli karaa macaashka Medicaid?**
Haa. Carruurta qaarkood ma helaan Medicaid-ka iyadoo lagu salaynayo ama la eegayo dakhliga qoyskooda balse waxaa laga yaabaa inay u-qalmaan iyadoo loo eegaayo naafanimadooda. Tani waxa loo yaqaanaa Go'aaminta naafanimada Medicaid ee malaha ah. Haddii ilmahaagu u-qalmi waayo iyadoo lagu salaynayo dakhliga qoyska, oo aad ku muujisay codsiga in ilmahaagu naafo yahay oo uu codsanayo adeegyada, nidaamka ONE ayaa si toos ah ilmahaaga ugu gudbinaya Kooxda Go'aaminta

Naafanimada Medicaid ee Malaha ah (PMDDT) si loo go'aamiyo u-qalmitaanka.

**Su'aalaha muhiimka ah ee u baahan jawaabta 'HAA' ee barnaamijka ONE waa:**

1. **Shakhsiga codsanaya caymiska caafimaadka ee ku qoran codsigan ma u baahan yahay in laga caawiyo hawlaha nolol maalmeedka (sida maydhashada/qubayska, labbisashada iwm) ama ku nool goob caafimaad ama hoyga dadka lagu xanaaneeyo?**
2. **Shakhsigu ma doonayaa inuu codsado adeegyada daryeelka muddada-dheer ee Medicaid?**
3. **Ma yahay qof Indhoole/Naafo ah?**

**Ka waran haddii ilmahaygu aanu u-qalmin iyadoo lagu salaynayo dakhliga qoyska?**

Waxaa ku soo wici doona shaqaalaha ka shaqeeya hubinta u-qalmida adeegga ODHS si aad u dhammaystirto qaadashada barnaamijyada kale ee Medicaid oo aad u go'aamiso tallaabooyinkaaga xiga. Tani waxaa ku jiri u gudbinta PMDDT (kor lagu sharraxay) si loo eego inuu ilmahaagu u-qalmo Medicaid iyadoo lagu salaynayo naafonimadooda. Haddii aadan kala xiriir karin telefoonka, waxaad wargelin ku heli doontaa boostada. Hubi inaad ka jawaabto codsigan si loo helo macluumaad dheeraad ah. Wareysigan dabagalka ah la'aantiis, codsigaaga waa la diidi doonaa, waana inaad dib u bilowdo.

**Ka waran haddii aan rumaysto in ilmahaygu uusan u-qalmi doonin Medicaid iyadoo lagu salaynayo dakhliga qoyskayaga? Wali miyaan buuxiyaa macluumaadka qof kasta oo qoyskayga ka tirsan ee ku yaala codsiga?**

HAA**. Codsiyada Medicaid oo dhan waa in si buuxda loogu qoro dhammaan xubnaha ka tirsan qoyskaaga si hab sax ah looga baaraandego. Ilmahaaga waxaa kaliya loo gudbin doonaa PMDDT haddii uusan u-qalmin iyadoo lagu salaynayo dakhliga qoyska.**

**Yaa iga caawin kara buuxinta codsigayga Medicaid?**

Barnaamijka I/DD ee ka jira degmadaada, ee loo yaqaano Community Developmental Disabilities Program (CDDP), ayaa kaa caawin kara inaad dirsato codsiga Medicaid. Iyadoo ku xiran barnaamijka ka jira deegaanka, waxaa laga yaabaa in ay kuu gudbiyaan iskaashatada bulsheed ama xafiiska Waaxda Adeegyada Dadweynaha ee Oregon (ODHS) ee ka jira degaanka kaasoo kaa caawin doona dirsashada codsiga. Meelaha qaarkood, shaqaalaha CDDP ayaa laga yaabaa inay si toos ah kuu caawiyaan.

Haddii ay dhibaato kaa haysato diritaanka codsiga barnaamijka ONE, fadlan ka wac Xarunta Adeegga Macmiilka ee ONE lambarka: 1-800-699-9075 laga bilaabo 7 subaxnimo ilaa 6 galabnimo, Isniinta ilaa Jimcaha. **Fadlan ka warqab in maadaama barnaamijka ONE uu yahay barnaamij cusub, waqtiyada sugitaanka waxay noqon karaan kuwo aad u dheer. U raacitaanka farriimaha halhaleelka ah ee afka ah si taxaddar leh ayaa kaa caawin doonta inaad ku hesho qofka saxda ah waqti gaaban gudahiisa. Eeg Talooyinka loogu talagalay Waalidiinta, Qeybta A1.*

**Miyaan u baahanahay inaan tallaabo qaado inta aan sugayo in la go'aamiyo in ilmahaygu u-qalmo Medicaid? Waa muhiim inaad ilaaliso dhammaan ballamaha aad la leedahay isku-duwaha adeeggaaga. Haddii aad seegto ama aad baajiso ballanta, waa inaad codsatid in dib loo dhigo isla markiiba. Waa muhiim in u-qalmitaanka adeegyada ee ilmahaaga in la go'aamiyo sida ugu dhakhsaha badan.**

**Maxaa dhacaya marka la go'aamiyo in ilmahaygu u-qalmo Medicaid?**
Marka la go'aamiyo in ilmahaagu u qalmo Medicaid, waxaa lagaaga baahan tahay inaad ogeysiiso isku-duwaha adeeggaaga kadibna iyaga ayaad la shaqayn doontaa si aad u ogaato adeegyada uu heli karo ilmahaaga. Tani waxaa loo yaqaanaa *kala talinta dooqa*. Waxaad awoodi doontaa inaad doorato adeegyada sida ugu fiican u daboolaya baahiyaha ilmahaaga. Marka laga soo tago adeegyada DD, waa in lagaala taliyo barnaamijyada kale ee ay maalgeliso Medicaid ee laga yaabo inaad awooddo inaad u hesho ilmahaaga.

**Ka waran haddii ilmahayga la go'aamiyo inuusan u-qalmin Medicaid?**
Waxaa jira xoogaa khayraad kooban oo ay heli karaan carruurta aan u-qalmin Medicaid. Qabso kulan aad la yeelanayso isku-duwaha

adeegyadaada si aad ugala hadasho fursadahaaga oo aad u qorshayso tallaabooyinkaaga xiga.

**Haddii ilmahaygu noqdo mid u-qalmo PMDDT ma waxaa jiri kara shuruudo la iska sii rabo?**
Marka ilmuhu noqdo mid u qalmo PMDDT waxaa lagaaga baahanyahay inaad hesho adeegyo bille ah (sida caadiga ah adeegga maaraynta kiiska bil kasta) si loo ilaaliyo u-qalmitaanka Medicaid. Waalid ahaan, waxaa muhiim ah inaad la xiriirto isku-duwaha adeegyada ubadkaaga bil kasta oo aad samayso filashooyinka ay rabaan CDDP-ga ee loogu talagaly la socodka iyo qorshaynta ilmahaaga.

**Macluumaad dheeraad ah ma loo baahan doonaa haddii ilmahaygu loo gudbiyo PMDDT?**
Haddii ilmahaaga loo gudbiyo go'aanka iyadoo looo marayo PMDDT, adiga iyo Isku-duwaha Adeegga ayaa la ogeysiin doonaa si aad u uruuriso wixii macluumaad dheeraad ah ee loo baahan yahay marka la gaarayo go’aanka. Marar badan CDDP ayaa awoodi doonta inay bixiso dukumentiyada loo baahan yahay (iyadoo la dalbanaayo oggolaanshahaaga). Liiska noocyada dukumentiyada laga yaabo in loo baahdo ayaa ku qoran gudaha *Talooyinka loogu talagaly Waalidiinta, Qeybta A4 .*

**Ka waran haddii ilmahaygu horau u qaadan jiray Medicaid? Miyaan u baahanahay inaan dib u codsado?**
MAYA. Uma baahnid inaad dib u codsato Medicaid. Dadka qaata Medicaid waxaa marka hore looga baahan yahay inay si joogto ah u dhammaystiraan dib-u-cusboonaysiinta Medicaid. Habkan waxaa barnaamijka ONE looga yaqaanaa Dib-u-cusbooneysiin. Dib-u-cusbooneysiinta Medicaid-ka waxaa lagu cusboonaysiin doonaa gudaha barnaamijka ONE isla wakhtigaas.

**Ka waran haddii ilmahaygu uu horay u helay Dakhliga Sugnaanta Bulshad ee Dheeraadka ah (SSI)?**
Haddii ilmahaagu haysto SSI, laakiin aan la go'aamin inuu u-qalmo Medicaid, ka codso ama codsi u dir Medicaid adigoo isticmaalaya nidaamka ONE. Markaad ku muujiso codsiga in ilmahaagu helo SSI, nidaamka ONE ayaa xaqiijin doona in ilmahaagu u-qalmo qaybta ku

habboon ee Medicaid. **Tixraac Talooyinka loogu talagaly Waalidiinta, qeybta A2, si aad u hesho tilmaamo ku saabsan sida loo codsado Medicaid.**

## Talooyinka loogu talagalay waalidiinta marka ay Codsanayaan Medicaid-ka loo maro barnaamijka cusub ee u-qalmitaanka ee New OregONEligibility

**Diyaargarow. Kahor inta aadan codsan Medicaid, waxaa muhiim ah inaad uruuriso macluumaadkan khaaska ah ee ku saabsan qof kasta oo qoyskaaga ka mid ah:**
Codsiga ONE Medicaid wuxuu kuu sheegi doonaa inaad siiso waxoogaa macluumaad gaar ah si aad u hubiso inaad buuxisay shuruudaha loogu talagaly barnaamijka. Codsiga Medicaid wuxuu kuu sheegi doonaa:

- ✓ Macluumaadka ku saabsan gaadiidka aad leedahay, guryaha aad leedahay iyo agabyada kale sida akoon-ka(ada) bangiyeed, akoon-ka(ada) kaydka lacageed, saamiyada, deymaha, lacagta ku jirta sanduuqa dhigaalka ee ammaanka ah, qandaraasyada iibka, lacagaha guryaha, lacagaha hawlgabka, caddaynta dhitaysiga, lacagaha gaarka ah/hawl-socodsiinta, maalgashiga saamiyeed, lacagaha ammaanada ah iyo xisaabaadka sannadlaha ah iyo lacagaha hay'adeed. Tani waxaa laga yaabaa inay ku khusayso ama aysan ku khusaynin adiga
- ✓ Taariikh-da(aha) dhalashada ee xubnaha qoyska
- ✓ Macluumaadka ku saabsan caymiska caafimaadka ee laga heli karo goobta shaqada. Lambar-ka(rada) caymiska iyo magac-a(yada) qorshaha caymiska caafimaadka ee jira
- ✓ Lambar-ka(rada) sugnaanta bulshada, marka la heli karo ama haddii aad mid leedahay
- ✓ Dukumeenti-ga(yada) socdaalka, marka la heli karo ama haddii aad haysato
- ✓ Ciwaan-ka(ada) iimaylka, haddii aad haysato
- ✓ Shaqo-bixiyaha iyo macluumaadka dakhliga
- ✓ Dhammaan lacagaha la jaro oo ay ku jiraan lacagaha laga jaro iskiis u shaqaystaha
- ✓ Warqadaha abaal-marintu haddii aad qaadato nooc walbo oo dakhliga sugnaanta bulshada ah iyo haddii aad diyaar u tahay

- ✓ Sida aad u qorshaynayso inaad canshuurta u xarayso, tusaale., keli, lammaane isqaba oo wada deggan, lammane isqaba oo aan isla degganayn, carmal(-ad) laga dhintay, ama madaxa qoyska
- ✓ Liiska cashuuraha ee dadka kugu tiirsan
- ✓ Liiska kharashaadka macallimiinta, dulsaarka deynta ardayga ee la bixiyay, iyo biirtooyinka IRA ee cashuurta laga jari karo.

**A1.** Si aad u codsato u-qalmitaanka DD, fadlan booqo gujoraaca si aad u hesho codsiga loogu talagalay adeegyada DD: https://www.oregon.gov/dhs/seniors-disabilities/DD/Pages/index.aspx ama la xiriir Barnaamijka Naafonimada Korriinka Bulshada (CDDP) ee ka jira degaankaaga si aad codsiga u samayso. Booqo https://www.oregon.gov/dhs/SENIORS-DISABILITIES/DD/Pages/county-programs.aspx si aad u hesho liiska. Buuxi codsiga oo ku dir iimaylka, boostada, ama keen CDDP-ga ka jirta deegaankaaga. Geedi-socodkan wuxuu qaadan karaa waqti. Waxaan kugu dhiirigelinaynaa inaad u bilowdo sida ugu dhakhsaha badan**.** **Isku-duwaha adeegyadaada ayaa jadwal u samayn doona ballanta si uu u go'aamiyo u-qalmida ubadkaaga adeegyada oo uu u dhammaystiro ONA (Qiimaynta Baahiyaha Oregon). Waa muhiim inaad ilaaliso ballan kasta oo aad la yeelato isku-duwaha adeegyadaada si shuruudahan loo dhammaystiro sida ugu dhakhsaha badan. Marka ONA la dhammeeyo, isku-duwaha adeegyadaadu waa inuu soo gudbiyo foomka si uu u bilaabo adeegyada. Haddii ilmahaaga loo gudbiyay go'aaminta PMDDT, tani ayaa sidoo kale u baahan doonta in la dhammaystiro kahor inta aan Medicaid loo furin ilmahaaga. Haddii aad wax su'aalo ah ka qabto geedi-socodkan, fadlan weydii isku-duwaha adeegyadaada.**

**A2. Dadka Oregon ku nool waxay u codsan karaan Medicaid qaabab kala duwan:**

- **Onlaynka:** Ka adeegso Degelka Codsadaha ee ONE barta https://one.oregon.gov/; Hagaha caawinta onlaynka ah waxaa laga heli karaa halkan: Qorshaha Caafimaadka Oregon Bilowga Degdegga ah Hagaha
- **Codsiga warqadda ah**: Buuxi Foomka 7210 + Lifaaqa A
- **Fool-ka-fool**: Booqo xafiis kasta oo ODHS; ka raadi goobaha xafiiska halkan. La shaqee Kaaliyaha Bulshada ee OHA, Caawiyaha Codsiga OHP ama ka HEL caawiye halkan: https://healthcare.oregon.gov/Pages/find-help.aspx

- **Telefoonka**: Ka wac Xarunta Adeegga Macmiilka ee ONE lambarka: 1-800-699-9075 laga bilaabo 7 subaxnimo ilaa 6 galabnimo, Isniinta ilaa Jimcaha.

**Kahor inta aadan wicin:**
Fadlan ka warqab in maadaama ONE uu yahay barnaamij cusub, waqtiyada sugitaanka waxay noqon karaan kuwo aad u dheer. U raacitaanka farriimaha halhaleelka ah ee afka ah si taxaddar leh ayaa kaa caawin doonta inaad ku hesho qofka saxda ah waqti gaaban gudahiisa. Markaad wacdo Xarunta Adeegga Macmiilka ee ONE, waxaad maqli doontaa farriin salaan ah oo kuu sheegaysa inaad doorato luqadda aad doorbidayso: Ingiriisi, Isbaanish, Ruush, iyo Fiyatnaamiis iyo farriin halhaleel ah oo loogu talagaly "luuqado kale" ayaa la bixiyaa. **Marka xigta, waxaad dooran doontaa sababta aad u wacayso. Waa muhiim inaad macluumaadka xiriirkaaga ka dhigto had iyo jeer midii ugu dambeysay ee ku jirta ONE. Fadlan had iyo jeer iska hubi marka aad la hadlayso wakiil inay hayaan cinwaankaaga ugu dambeeyay iyo lambarka telefoonka aad adiga leedahay.**

| Dadka Oregon ku nool waxay u codsan karaan Medicaid qaabab kala duwan: | | | |
|---|---|---|---|
| **Onlaynka:** | **Fool-ka-fool:** | **Telefoonka:** | **Codsiga Warqadda Ah:** |
| Ka adeegso Degelka Codsadaha ee ONE barta https://one.oregon.gov/; Hagaha caawinta onlaynka ah: Qorshaha Caafimaadka Oregon Bilowga Degdegga ah Hagaha | Booqo xafiis kasta oo ODHS; ku raadi goobaha xafiiska ku yaalo onlaynka. La shaqee Kaaliyaha Bulshada ee OHA, Caawiyaha Codsiga OHP; Hel Caawiyeyaal: | Ka wac Xarunta Adeegga Macmiilka ee ONE: **1-800-699-9075** laga bilaabo 7 subaxnimo ilaa 6 galabnimo, Isniinta ilaa Jimcaha. | Buuxi foomka 7210 + Lifaaqa A |

**A3. Waxa ay tahay inaad ka ogaato su'aalaha la xiriira naafonimada ee ku saabsan codsi-ga(yada) Medicaid:**
Waxaan rabnaa inaad ka warqabto qaar ka mid ah su'aalaha muhiimka ah ee laga yaabo inaad aragto iyo inaad fahamto waxa lagaa weydiiyo naafonimada ilmahaaga:

> **<u>Su'aalaha Naafonimada:</u> Ma jiraa xubin ka mid ah qoyskaaga oo indhool ah ama qaba naafonimo rasmi ah?** Jawaabta **HAA** ah ee su'aashan waxay kugu qasbi doonta in si dhaqso ah uga jawaabto su'aalaha naafonimada la xiriira ee ku saabsan qof gaar ah oo ka tirsan qoyskaaga.
>
> **<u>Su'aasha Adeegyada Daryeelka Muddada Dheer:</u> Ma jiraa qof ka tirsan qoyskaaga oo u baahan adeegyada daryeelka muddada-dheer?** Haddii ilmahaagu u baahan *yahay taageero nooc kasta ha ahaatee* naafonimadiisa awgeed, jawaabtu waa **HAA**. Taasi macnaheedu MA AHAN inaad ka codsato daryeelka muddada-dheer goob ka baxsan hoyga sida hoy la wada deggan yahay.
>
> **<u>Su'aasha Waxqabadyada Nolol Maalmeedka (ADL)</u>: Ma jiraa qof u baahan in laga caawiyo waxyaabaha ay ka mid yihiin socodka, isticmaalka musqusha, qubeyska ama labbiska?** Su'aashani waxay wax ka badan naga weydiinaysaa awoodda jireed ee lagu dhammaystirayo hawlahan. Tusaale ahaan, haddii ilmahaagu u baahan yahay jadwal muuqda, farriin halhaleel ah oo afka ah ama taageero habdhaqan, jawaabtu waa **HAA**. Ama tusaale ahaan, haddii ilmahaagu jir ahaan awooddo inuu labbisto laakiin laga yaabo inuu garan waayo inuu jaakad dhaxameed xirto marka uu baraf da'ayo, jawaabtu waa **HAA.**

**A4. Haddii aad kulan la yeelato PMDDT, waxay gacan ka geysan kartaa in macluumaadkan la heli karo:**
Shuruudaha PMDDT ay tahay in la buuxiyo way ka duwan yihiin u-qalmitaanka DD. Waxay eegaan ogaanshaha xaaladda iyo baaxadda ilmuhu u buuxinayo heerarka korritaanka. PMDDT waxay u baahan tahay **<u>laba</u>**

sanno oo diiwaanada caafimaadka, diiwaanada caafimaadka dhimirka, iyo diiwaanada waxbarashada ah si loo sameeyo go'aan caafimaad oo ku saabsan in ilmuhu buuxiyo shuruudaha naafada ee Maamulka Sugnaanta Bulshada (SSA) ee loogu talagaly u-qalmitaanka.

- ✓ Liiska ogaanshaha xaaladeed ee loogu u-qalmitaamo

- ✓ Dhammaan diiwaanada laga helo faylka DD ee loo adeegsaday go'aanka u-qalmitaanka DD.
- ✓ IEP-gii ugu dambeeyay iyo baaritaan/baaritaano kasta oo dugsiyeed ama ESD.
- ✓ Waa muhiim in la isticmaalo foomka MSC 3010 ee DHS ee Shaacinta Macluumaadka (ROI) ee saxda ah ee ODHS si loo wadaago macluumaadka bixiye kasta oo ubadku arkay **2-dii sanno ee la soo dhaafay** (marka laga reebo dhakhtarka ilkaha). Waxaad u baahan doontaa mid SSA ah, iyo mid dugsiyeed oo hadda ah ama midkii ugu dambeeyay. Shaacinta Macluumaadka (ROI) ee loogu talagaly Maamulka Sugnaanta Bulshada (SSA) ayaa loo baahan yahay xiitaa haddii uusan ilmuhu qaadan wax macaashyada SSI ah.

**Ugu dambayntii, fadlan xusuusnow,** wakhti kasta inta lagu jiro hawshan, waxa laga yaabaa in uu kula soo xidhiidho shaqaalaha u-qalmitaanka ODHS oo codsanaya macluumaad dheeraad ah. In ka badan hal isku day ayaa lagu sameyn doonaa in lagaala soo xiriiro telefoonka iyo boostada. ODHS waxay leedahay sharciyo gaar ah oo ku saabsan buuxinta codsigaaga si waqtiyeysan. Haddii aadan uga soo jawaabin codsiyada macluumaadka dheeraadka ah si waqtiyeysan, waxaa laga rabaa inay diidaan codsigaaga. Taasi macneheedu waa inaad dib u soo bilaabi doonto hawshan mar kale.